

IN SOMALI

Tusmada:

- Ka soo adeegsashada farmashiyada
 - Rijeetto ku soo qaadasho iyo kharashka
 - Xadaynta kharashka daawada – daawada rijeettada lagu qaato
 - Intee in la eg oo daawo ayaan iibsana kara?
 - U soo adeeg qof kale
 - Habka hoos u dhiga kharashka
 - PUL – Habka warbixin-shaqsiyeed loola dhaqmo
 - Sirta iyo xajinta sirta xirfada
 - Ku saabsan apoteket.se

- Daawooyinka iyo dalalka dibada
 - Socdaalkaaga ka hor
 - Daawooyinka lagu tiriyo kuwa maan-dooriyeha ah
 - Caddaynta loo yaqaanno [Schengenintyg]

- Xiriir

Ka soo adeegsashada farmashiyada

Ka soo adeegsashada farmashiyada - Rijeetto ku qaadasho

Farmashiyooyinka waxay iibiyaan daawooyinka rijeettada lagu qaato, iyo kuwa rijeetto la'aan la iibsana karo. Daawooyinka rijeetada lagu qaato, waa in uu qof takhtar ah ama isku darajo ah (förskrivare), daawada ku soo qora. Teeda kale, waa in warqadda aqoonsigaaga la timada. Markii takhtarku u rijeettada farmashiyada toos ugu soo gudbinaayo, wuxuu badi ahaan adeegsada farsamada elektroonikada. Laakinse waxaa dhici karto in iyadoo qoraal ah u gacanta ka saaro. Haddii rijeetto qoraal ah lagu siiyo, waa inaad farmashiyada tusta markii aad daawada ka soo qaadanayso.

Daawooyinka loo yaqaanno [Generika], oo ah daawooyin nooc kale lagu beddeli karo

Xeer ahaan waa in farmashiyada ku wargelisa, inaad iibsana karto daawo ka raqiisan tii takhtarku ku soo qoray. Daawadaas oo ah mid u dhigmata tii lagu soo qoray. Laakinse waa haddii daawadaas laga heli karo farmashiyada aad ku sugan tahay.

Markii daawada laga beddelaayo shaqaalaha farmashiyo way ku wargelinayaan. Haseyeeshe, adigu waxaad awooda inaad diido oo aad iibsato nooca takhtarkaaga ku soo qoray. Taasoo keeneyso inaad iska bixiso qiimaha dheeraadka ah. Haddii ay jirto sabab aanan ku saamaxayn beddelaadada daawada, wuxuu takhtarku caalamad saarayaa rijeettada.

Noocyaha daawooyinka isku kartida ah ee layska beddeli karo, waxaa go'aan ka gaarto Hey'adda daawooyinka [Läkemedelsverket]. Daawooyinka waxay yeelan karaan magacyo iyo muqaalka baakooyinka ee kala duwan. Haseyeeshe maadada wxtarka ah ee laga sameeyay waa isku mid.

Ka soo adeegsashadafarmashiyada**- Xadaynta kharashka daawada ee daawooyinka rijeettada lagu qaato****Daawooyinka kharashkooda xaddaysan**

Dalka Iswiidan kharashka daawooyinka rijeettada lagu qaato, waa kharash xadadan. Taaasoo macnaheeda ay tahay in kharashka daawooyinka rijeettada lagu qaato, ee ugu badantii qofku jeebkiisa ka bixinaayo, laba iyo tobanka bilood ba waa 1 800 karoon. Taasoo loo yaqaanno [läkemedelsförmånen]. Kharashka dheeraadka waxaa bixinayo Goleha Gobolka. Hey'adda daryeelka ilkaha iyo daawooyinka [Läkemedelsförmånsverket, TLV], waa hey'adda go'aan ka gaarta daawooyinka ku xusan Xadaynta kharashka daawada [högstnadsskyddet].

Daawooyinka kharash xadaynta ku tirsan:

- daawooyinka badidooda ee rijeettada lagu qaato,
- waxyaalaha qalliinka kadib la adeegsado,
- waxyaalaha daawo qaadashada awgeed la adeegsado iyo
- waxyaalaha bukaan-socodka iskiisa u ugu kormeero daawo-qaadashada.

Ka soo adeegsashada farmashiyada - Jarranjarada hoos u dhigta qiimaha**Jarranjarada hoos u dhigta qiimaha**

Haddii laba iyo tobban bilood gudahooda aad 1 800 karoon daawo ku iibsato, waxaad xaq ku leedahay in inta laba iyo tobankaas bilood ka hartay, lacgag la'aan daawooyinka takhtarka ku soo qoray lagugu siiyo. Intii aadan heerkaas aadan gaarin, waxaa lagu dhaqma jarranjarada hoos u dhigta qiimaha [rabattrappan] mar kasta oo daawo iibsato. Carruurta qoyska oo da'dooda ka horeeyso 18 sano, waa laysku xisaabiya markii xadaynta kharashka daawada la adeegsanaayo.

Ku bir keyda kombyuutarka ee xadaynta kharashka daawada

Habka ugu fudud ee aad ugu biiri karto xadaynta kharashka daawada, waa adigoo shaqaalaha farmashiyada wargeliyo markii daawada aad ka soo qaadantayso. Ku birida keyda kombyuutarka ee xadaynta kharashka daawada, waxay shaqaalaha farmashiyada u fududaynaysa ka warqabida inaad xadaynta – 1800 karoon gaartay. Maadaama farmashiyoyinka oo idil ay ka tirsan yihiin isla keydkaas, fiirogaar ha lama siiyo farmashiyada aad ka deegatay.

Haddii aadan adeegsashada keeydka aadan doonayn, iskaaga ayaa kharashka u la socon karta. Haddii aad doorato inaad ku birin keydka, waa in adigoo sito warqadda loo yaqaanno [högstnadsbevis] shaqaalaha farmashiyada wargeliso heerka aad ka sugan tahay.

Adigu waxaad xadaynta kharashka daawada xaq ugu yeelan karta haddii:

- aad degan tahay dalka Iswiidan.
- dalka Iswiidan ka shaqayso ama aad haysato foomka loo yaqaanno [E111-blankett] ama foom la mid ah.
- rijeettada lagaga qoray dalka Iswiidan.

Ka soo adeegsashada farmashiyada – Intee in la eg oo daawo ah ayaan iibsan kara?

Shuruudaha xadaynta kharashka daawada lagu iibsano waxaa kamid ah:

- Waa in xilliga isticmaalka daawada rajeetto lagu qaato, usna ka badnayn saddex bilood.
- Hal goor ayaa mar kasta daawada farmashiyada ka soo qaadan karta. Nidaamku waa sidaasi xitaa haddii muddada ay ka horeeyso saddex bilood.
- Iibsasho cusub ku salaysan qiimmo ka jaban, waxay suurtagal noqon karta, markii 2/3 mudadii iibsashadii hore ka soo wareegatay, ku salaysan qiyaasida daawada ee rajeetto ku qoran. Iibsasho cusub ku salaysan qiimmo ka jaban, loogu talagalay ku isticmaalka saddexda bilood ah, waxay suurtagal noqon karta markii saddex bilood ay ka soo wareegatay.
- Magaca goobta shaqada ee qofka daawada ku soo qoray (noqon karo takhtarka ama shaqaalaha daryeelka caafimaadka), waa in rajeetada lagu soo qora, isagoo ah [streckkod]. Teeda kale, daawo qoreha waa in uu rejetada ku calamadeeya in daawada lagu iibsano karo qiimmo jaban.
- Haddii aadan doonayn inaad ku biirto keydka xadaynta kharashka daawada, laakinse aad doonayso inaad adeegsato xadaynta kharashka daawada, waa inaad had iyo jeer sidata warqadda loo yaqaanno [högkostnadsbevisen]

Nidaamkan waxaa ka reeban

- Waxaad awooda inaad iibsato daawo intaas ka badan, hal mar ama dhor jeer, hab aanan waafaqsanayan qiimmo ka jaban. Laakinse waa in laf ahaantaada aad iska bixiso kharashka dheeraadka ah.
- Xaaladaha qaarkood, tusaale dibad ku sugnaansho muddo dheer ah. Xaaladaas daawooyinka qiimmo jaban waad ku iibsano karta. Laakinse waa inaad qoraal ku caddaysa xaalada gaarka ah.
- Daawooyinka uur-qaadida laysaga ilaaliyo (kiniini/irbado) guud ahaan way ka reeban yihiin nidaamka saddex bilood ah.

Ka soo adeegsashada farmashiyada - u soo adeegsashada qof kale

Haddii qof kale farmashiyada ugu soo adeegayso, waxaad u baahan tahay oggolaanshaha qofkaas. Taasoo u ku muujin karo waakiilashada loo yaqaanno [fullmakt]. Ku caddaynayso inaad xaq u leedahay inaad qofkaas daawada u soo iibiso.

Waxaad u baahan tahay [fullmakt] haddii:

- u dalbayso ama daawo qof kale farmashiyada ugu soo iibinayso,
- aad damacsan tahay in magaca qof kale deynta kolba xooga layska bixiyo daawo ku iibsato (waa haddii qofkaas u heshiis shirkada Apoteket AB la galay) ama
- in iyadoo qoraal ah lagu siiyo rajeettooyinka farmashiyada ku keydsan ee magaca qofka loo adeegayo ku qoran.

Markii qof kale u soo adeegeyso

La kaalay [fullmakt] buuxsan kuna saxiixan qofka u soo adeegeyso. Markii aad qofka u adeegeyso tus farmashiyada [fullmakten] iyo warqada aqoonsigaaga.

Xilhaayaha/waalidka ubadkiisa daawada u soo iibinaayo

Xilhaayaha/waalidka ubadkiisa oo da'diisa ka hooseeysa 18 sano daawo rajeetto lagu qaato u soo iibinaayo, uma baahna [fullmakt]. Waxaa looga baahan yahay oo keliya warqada aqoonsigaaga. Haddiise qofku usna ahayn waalidka cunugga, waxaa laga raba [Fullmakt], xitaa haddii uu yahay waalidiinta loo yaqaanno "bonusföräldrar".

Su'aalaha [fullmakter] ku saabsan?

Su'aalaha [fullmakter] ku saabsan kala xiriir farmashiyada xarunta macamiisha, [Kundcentrum] taleefan 0771-450 450.

Ka soo adeegsashada farmashiyada - PUL – Habka warbixin-shaqsiyeedka loola dhaqmo**Warbixinada ka diiwan gashan farmashiyada**

Ma doonayso inaad farmashiyada ka adeegato, adigoo adeegsanaayo goobta Internetka apoteket.se? Haddaba, waxaan u baahan nahay warbixin-shaqsiyeedkaaga sidii aan wax ugu qabanno rijeettada lagu soo qoray. Markii oggolaansho arrinta ku saabsan aan ka helno, oo u dhacdo hab waafaqsan Xeerka xajinta warbixin-shaqsiyeedka [personuppgiftslagen] (1998:204), waad ka adeegsan karta goobta Internetka. Warbixin-shaqsiyeed waxay lagamaarmaan u tahay sugida heerka sare ee wax loogu qabto rijeettada lagu soo qoray. Warbixin-shaqsiyeedka waxaa la diiwan geliyaa markii daawada farmashiyada aad ka soo doonato, ama daawooyin kale.

Waxaan ku hawlgalna warbixin-shaqsiyeedkaaga:

- Markii aad farsamada Internetka adeegsanayso; warbixinta codsigaaga laga maarmaan u ah, badeecad ku wareejinta iyo lacag bixinta ayaan adeegsana.
- Suuq gelinta, baaritaanka macamiisha iyo diyaarinta tirokoobka awgood. Waa haddii ammurta ay daawo ku saabsanayn. Adigu waxaad iyadoo qoraal ah, maamulka farmashiyada wargelin karta inaad raali ka ahayn in warbixin-shaqsiyeedkaaga loo adeegsado suuq gelin awgeed.

Ka soo adeegsashada farmashiyada - Sirta iyo xajinta sirta xirfada

Anaga dhamaanteen waxaan tixgelina xajinta sirta xirfada, oo ka hirgashay goobaha lagu daryeelo bukaan-socodyada iyo caafimaadka.

Macnaha xajinta sirta xirfada waxaa weeyaan:

- in warbixin ku saabsan rijeettadaada aanan la bixi karin,
- in warbixin ku saabsan daawooyinka aad qaadato aanan la bixi karin,
- in diiwanka warbixintaada laga eegi karo haddii laga maarmaan u tahay, daawo ka qaadashada ama haddii ruqsad aan ka helno.

Ka soo adeegsashada farmashiyada - Ku saabsan apoteket.se

Goobta Internetka apoteket.se waa goobta rasmiga ah ee Apoteket AB. Waxaa gebi ahaan maalgeliya Apoteket AB oo ah shirkad dowlada iska leedahay. Ujeedaduna waxay tahay in shicibka loo fududeeyo sidii daawo ay kaga iibsan lahaayeen meel alle meeshii dalka ay kaga sugan yihiin.

Goobta Internetka ee farmashiyada Apoteket.se hab joogto ah ayaa loo horumariya. Qaybo goobta Internetka kamid ah hab fiican ayee u shaqaysa, kuwa kale na hab aanan sidaas u fiicanayn ayee u shaqeyaan. Sidaas awgeed, anaga oo ah hawlwadeneeyada goobta, waxaan hab buuxda u soo dhowaynayna aragtidiiina. Waxaad nagala xiriir kartaan emailkayga oo ah redaktionen@Apoteket.se ama xarunta macamiisha [Kundcentrum], eeg la xiriir. Warqadaha oo idil waan akhrisana.

DAAWOYINKA IYO SOCDAAL DAL DIBADEED

Daawooyinka iyo socdaal dal dibadeed – Socdaalka horrantiisa

Gal socdaal adigoo daawooyinkaaga sito

Haddii daawooyinkaaga ay laga maarmaan u yihiin noolol-maalmeedkaaga, waxaad xaaladaas ku qasban tahay inaad xilliga socdaalka shandada ku qaadato. Taasoo caadi ah. Hase ahaate, socdaalka horrantiisa waa inaad ku dhaqaaqda diyaargarow. Hab waafaqsan xeerka daawo soo gelinta dalka aad u socoto.

Ka feker:

- Daawooyinkaaga ha ka saarin baakadahooda, taasoo u hawlfududaynayaso kormeeraha garoonka ama dekada. Teeda kale, haysashada baakada waxay wax ku taraysa haddii daawooyinka ay ka dhamaadaan, oo aad u baahato in kuwo cusub lagu qoro.
- La xiriir safaarada dalka u socoto, ka codso warbixin ku saabsan xeerarka daawo soo gelinta ee dalkooda ka hirgalay. Tilaabadaas waxay siiba muhim ugu tahay, haddii daawooyinkaaga ay yihiin kuwa daawooyinka lagu tiriyo kuwa maan-dooriyeha ah, sida kuwa hurdada keena ama xannuunka culus hoos u dhiga.
- Haddii socdaalka dayuurad aad ku geleyso, waxaa dhici karto in ay jiraan nidaam u gaar ah. Kuwaasoo inaad tixgeliso ah. Waxaa dhici karto in ay jiran daawooyin aan loo oggolayn in lagu sito shandada diyaarada loola koro. Sida kuwa dheecaan ah. Warbixin dheeraad ah ka akhriso goobta Internetka Luftfartsstyrelsen >> (xiriiriye luftfartsstyrelsen.se)

Shahado iyo calaamadaynta farmashiyada

Haddii daawooyinkaaga ay yihiin kuwa hoorka/dheecaanka ah, kuwaasoo socdaal la geli doonto, oo aad doonayso in baako kasta gaar ahaan loo calaamadeeyo, u sheeg shaqaalaha farmashiyada markii aad ka soo qaadanayso. Haddiise daawooyinka mar hore lagu siiyay oo aad aqalkaaga la tagtay, xaaladaas suurtagal ma noqon karto in lagu calaamadeeyo.

Farmashiyada ayaa caddaynta loo yaqaanno [Schengenintyg] laga qaata. Waa haddii daawooyinka lagu tiriyo kuwa maan-dooriyeha ah u qaadan doonto dal kamid ah kuwa loo yaqaanno dalalka [Schengenland]. Haddiise aad u baahan tahay caddaynta daawooyinka lagu tiriyo kuwa maan-dooriyeha ah iyo kuwa aanan ahayn ba, dal aanan ka tirsanayn kuwa kor ku xusan, waxaad la xiriiri karta takhtarkaaga. Farmashiyada caddaynta noocaasi ah kuma siin karto.

Daawooyinka iyo dalalka dibada – daawooyinka lagu tiriyo kuwa maan-dooriyeha ah iyo caddaynta loo yaqaanno [Schengenintyg]

Nidaamka daawooyinka lagu tiriyo kuwa maan-dooriyeha ah, way kala duwan yihiin hadba dalka u khuseeyo. Dadyoow socdaal ku tago dal kamid ah kuwa loo yaqaanno dalalka Shengen, oo ku qasban in shandada ay ku qaatan daawooyinka lagu tiriyo kuwa maan-dooriyeha ah, waa in uu sidata warqad u ku caddaynaayo in uu daawada xaq u leeyahay. Farmashiyada ayaa caddaynta noocasi ah bixiso. Haddiise u qofku socdaal ku tegi doono dal aanan kamid ahayn kuwa kor ku xusan, waa in safaarada dalkaasi u la xiriira, oona waydiiya nidamkooda

Tusaale ahaan, daawooyinka lagu tiriyo kuwa maan-dooriyeha ah way tiro badan yihiin, waxaa ka mid ah kuwa hurdada keena, dejiya qofka ama xannuunka culus loogu talagalay. Maandoorie ku tirinta in yar ayee dalalka ku kala duwanaan karaan. Laakinse habka dalka Iswiidan ugu tirisay ayaa wuxuu tilmaamaya sida dalal tiro badan ula dhaqmaan, maxaayeelay dalalka oo idil waxay ka tusaale qaataan

liiska maan-dooriyeha ee Qaramada Midoobay. warbixin dheeraad ah ka akhriso Läkemedelsverket >> (länk till http://www.lakemedelsverket.se/Tpl/ProduktSearchPage____392.aspx)

Dalalka haatan khuseeya nidaamka Schengen waxaa weeyaan: Belgiuma, Bulgaria, Cyprus, Denmark, Estonia, Finland, France, Greece, Netherlands, Ireland, Iceland, Italy, Latvia, Lithuania, Luxembourg, Malta, Norway, Poland, Portugal, Romania, Slovakia, Slovenia, Spain, Great Britain iyo Northern Ireland, Sweden, The Czech Republic, Hungary, Germany iyo Austria.

Sidatan yeel:

- Buuxi foomka loogu talagalay shahaada [Schengen]. Foomka waxaad ka soo qaadan karta farmashiyada, [Läkemedelsverket] ama halkaan ayaa ka duuban karta isagoo af iswiidish ah >> (xiriir foomka farmashiyada Apoteket AB 1197)
- Daawoo kasta hal foom u buuxi.
- Booqo farmashiyada foomka na u gey.
- Tus rijeettada ama baakada daawoda (leh calaamada farmashiyada), baasaboor ama warqada aqoonsiga [ID-kortet].

XIRIIR

Xiriir – la xiriir farmashiyada

Xarunta macaamiisha way furan tahay habeen iyo maalin ba. Waxaad waydiin karta su'aallo ku saabsan daawooyinka, qiimahooda, helidooda, rijeetto, bixinta aragtida iyo caabasho. Waxaad adeegsan karta taleefan, email ama warqad caadi ah.

E-mail noo soo dir

Waxaad jawaab naga heleysa laba maalmood gudahooda, ka reeban sabti iyo axad. e-mailka soo dir >> (xiriiriye foomka e-mailkaaga)

Wac 0771-450 450

Xarunta macaamiisha waxay ka jawaaban talaafanada oo idil. Waxaa xarunta ka hawlgalo hawlwadeneyada ka jaawbi karo su'aalaha oo idil, qaarkooduna waxay af iswiidish ka sokkow ku hadlaan luqado kale. Kadib markii farinta duuban aad dhageysatay, sug ilaa u qof kula hadlo.